


# TALLAALKA COVID-19

## TALLAALKA XOOJINTA

### Yaa qaadan kara tallaalka xoojinta ah?

Dadka soo socda ayaa heli kara tallaalka xoojinta ah haddii ay qaateen:

 **Johnson & Johnson** tallaalkooda COVID-19 ugu yaraan laba bilood ka hor.

 **Pfizer** ama **Moderna** labada jeer ee tallaalladooda ugu yaraan lix bilood ka hor **BALSE** waa in ay yihiin:


- 65 jir ama ka weyn.
- 18 jir iyo ka weyn balse ku nool xarumaha muddada dheer.
- 18 jir iyo ka weyn oo ku jira xanuun ama xaalado kale.
- 18 jir iyo ka weyn oo ku nool ama ka shaqeeya xarumaha khatarta-badan, sida:
  - Dadka ka shaqeeya caafimaadka, waxbarashada, wax-soosaarka.
  - Dadka ku nool goobo la wadaago ama caruur badan, sida hoy meelgaar ah.

**Dadka xaqa u leh waxay qaadan karaan tallaalka kasta oo ah xoojin oo ay ka heli karaan.**

**Xaq uma laha?** Ha ka welwelin, **tallaallada COVID-19 waxaa laga helaa difaac adag marka la qaato qeybtooda hore**. Xataa iyadoo ay soo ifbaxayaan faracyo kale, oo uu wixtarka tallaalka sii daciifacyo muddo ka dib, dadka sida buuxda loo tallaalay waxay u badan yihiin inay ka badbaadi karaan faayruska ku faafaya dadka aan la tallaalin.





### Maxay tahay sababta ay dadka qaar ugu baahan yihiin tallaalka xoojin ah?

Waa wax cilmi ahaan lagu soo xaqiijiyey in uu tallaalka ka dib dadka qaar difaacii ka daciifay balse uusan qaar kale weli difaacu u xooggan yahay. Dadka uu difaacu ka daciifay, tallaalka xoojin ah ayaa u fiican oo waxay ka helayaan difaaca xanuunka, in aysan aad ugu xanuunsan, in aan isbitaal la seexin, iyo xataa in aysan u dhiman COVID-19.



# Maxay ku kala duwan yihiin tallaalka xoojinta ah ama tallaalka dheeraad ah?

Waxaa isku mid ah waxa ay tallaalladaas ka sameysan yihiin, laakiin cinwaankooda kala duwan si ay dadku u ogaadaan kuwa u baahan tallaalka xoojin ah ama kuwa u baahan tallaalka dheeraad ah, sababta, iyo goorta.

	Tallaalka xoojinta	Tallaalka dheeraadka ah
<b>DADKA QAADANAYA</b> 	Qof kasta oo qaatay Johnson & Johnson, iyo dadka qaarkood markay <b>khatar weyn</b> ugu jiraan COVID-19 iyagoo qaatay Pfizer ama Moderna.	Dadka uu <u>difaacoodu yahay dhexdhexaad ilaa heer daran.</u>
<b>SABABTA QAADASHADA</b> 	Si loogu xoojiyo habdhiska difaaca ka dib marka uu difaacii hore ee adkaa <b>ka yaraaday muddo ka dib.</b>	Si loo <b>difaaco dadka difaaca xoogaa fiican ka helay</b> ka dib markay qaateen labadii jeer ee hore.
<b>GOORTA QAADASHADA</b> 	Waxaa la qaadan karaa <b>2 bilood</b> ka dib Johnson & Johnson ama <b>6 bilood</b> ka dib markii ay si buuxda u qaateen Pfizer ama Moderna.	Wakhtiga lagu qaadanayo waa <b>28 maalmood</b> ka dib markii ay qaateen qeybtii ugu dambeysay ee tallaallada Pfizer ama Moderna.
<b>QAADASHADA TALLAALKA</b> 	Dadkii sida buuxda u soo qaatay tallaallada <b>Pfizer</b> ama <b>Johnson &amp; Johnson</b> ama <b>tallaalka barkiis oo ah Moderna.</b>	Waxa keliya ee sida buuxda la rabo waa tallaallada Pfizer ama Moderna.

Dadka qaatay tallaalka mRNA dheeraadka ah, waxa ay tallaalka xoojinta ah qaadan karaan lix bilood ka dib.

## Tallaalka xoojinta ah ka soo qaado goobtaadii hore ee tallaalka COVID-19.

Ka baaro [vaccines.gov](https://www.vaccines.gov), soo garaac 211, lambarka ZIP code ku soo dirso lambarka 438829 si aad ugu hesho goobta kuugu dhow.

Tallaalka xoojinta ah waa si aan faayruska uga helno difaac iyo badqabid. Dadka kuwa **aan weli la tallaalin khatar ayey ugu jiraan COVID-19.** Dadka in lagu caawiyo qaadashada tallaalkooda hore waa dedaalka ugu muhiimsan ee lagu joojin karo xanuunka nagu faafaya.

Faahfaahinta tallaallada xoojinta ah ka eego [dhs.wisconsin.gov/covid-19/vaccine-dose.htm](https://dhs.wisconsin.gov/covid-19/vaccine-dose.htm)